

IIB MA GALO

F'AAFINTA RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho 25ka Jannaayo 1986 L. 1 R1

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

SHARCI L. 3 ee Jen. 1986

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanaadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faaafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 3 ee Jen. 1986, Wax ka beddelid da Sharciga Qareennada

Bog; 32

QAYBTA

LABAAD

XEER

W. M.

TALCOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

QAYBTA

SADDEXAAD

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.12.85,
Lumid Jeeg. War. L. 137714 ku qoran
Axmed Macallin Maxamuud L. 15

» 34

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.12.85,
Cabdullaahi Seed Maxamuud L. 14

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

- Sharci lambar 3, taariikh 13 Jan. 1986: Wax ka beddelidda Sharciga Qareennada.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Mihnadda Qareennimada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa la madax bannayey waxaana la 'baabi'iyey iskaashataada Qareennada.

Qod. 2aad

Faqradda 2aad, Qod. 6aad Sharciga lambar 85 ee 21.10.1975 waxaa loo beddelay sida soo socota:

« 2. Garsoorayaasha, Barayaasha Kulliyadda Sharciga ee Jamhuuriyadda iyo Hawlwadeennada Qareennimo ugu shaqeyey Dawladda iyo Hay'adaheeda muddo aan ka yareyn 5 sannadood, hay'adaha Shaqaaddada Jaamacadda ee lagu sheegay xarafka (j), faqradda 1aad ee Qodobkan, waa laga dhaafayaa imtixaanka ku sheegan faqradda hore, xarafkeeda (x)».

Qod. 3aad

Faqradda 2aad, Qodobka 7aad, Sharciga lambar 85 ee 21.10.1975 waxaa loo beddelay sida soo socota:

« 2. Sharciyaqaanka loo oggolaaday Qareennimada waxaa lagu qorayaa Diiwaanka Qareennada marka uu baxsho ujuurrada gelitaanka Qareennimada oo dhan Sh So. 5.000/=».

← Qod. 4aad

Qaybta saddexaad, Sharciga lambar 85 ee 21.10.1975, Diiwaanka Ashuubta ee ku tilmaaman waxaa gaadaya

Guddiga Talo-bixinta iyo Diiwaangelinta Qareennadda oo go'aankoodu kama dambeys yahay.

Qod. 5aad

Qodobka 5aad ee Sharciga lambar 85 ee 21.10.1975, xarafka (x) waxaa loo beddelay sida soo socota:

« (x) Qareen uu ka dhex magacaabo Qareennada Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diintu, sannad walba».

Qod. 6aad

1. Xadka ugu sarreeya ee Xushmada Qareennada waxaa lagu xaddidayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

2. Inta laga soo saarayo Xeerka kor ku tilmaan, waxaa lagu dhaqmayaa tacriifada ku qoran warqado tilmaameedka lambar 1, 2, 3, 4 iyo 5 ee ku lifaaqan Sharciga Qareennada.

Qod. 7aad

1. Waxaa la tirtiray Qodobbada 1 iyo 16 ee Sharciga lambar 85 ee 21.10.1975 iyo dhammaan lifaaqyada Sharcigaas oo ku saabsan Hawlaha Iskaashatada Qareennada.

2. Waxaa kaloo la tirtiray meel kasta oo Sharciga kor ku tilmaaman gudihiisa ku qoran yahay ereyga ISKAASHATADA.

Qod. 8aad

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13 Jan. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)